Somali
(Af-Soomaali)

**Ogeysiiska Waalidka ee ku saabsan Meeleynta Ardayga**
**Barnaamijka Horumarinta Luqadda Ingiriisiga**

**Magaca Ilmaha:** ________________________________________ **Taariikh:**_________________________

**Dugsi:** _________________________________ **Degmada Dugsi**: __________________________________

**Heerka Is-qoritaan:** ____ **Ku cusub barnaamijka** ____ **Ku sii jiraya barnaamijka**

---

Gacaliye/Gacaliso Waalid ama Mas'uul,

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku wargaliyo in ilmahaagu u ka heli doono taageero dheeraad ah isaga/iyada oo u maraya barnaamijka Horumarka Luqadda Ingiriisga markay tahay sannad dugsiyeedka *INSERT YEAR*.

Dagmada waxay cunugaada ku tilmaantay in aqoontiisa Ingiriisiga ay kooban tahay taasoo lagu ogaaday natiijadaha ka soo baxay imtixaan laga qaaday cunugaada. Aqoonta cunugaada u leeyahay Ingiriisiga waxaa lagu cabbiray in ay tahay Heerka 1aad: ___, Heerka 2aad: ___, Heerka 3aad: ___ xagga Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee Washington (Washington English Language Proficiency Assessment) (WELPA).

Ujeeddada barnaamijkani waa sidii loosiin lahaa taageero dheeraad ah ardyada aan wali ku fiicnayn inay ku hadalaan, dhageystaan, akhriyaan oo ay qoraan Ingirisiga. Barnaamijka aya kaa caawin doona ilmahaagu la kulmo heerarka guuleysiga tacliimeed ee ku habboon da'da ee loogu talagay ka gudubka fasalak iyo qalinjabinta.

Ardayda waxay xaq u yeeshaan barnaamijka horumarinta luqadda Ingiriisiga ilaa ay ka gaaraan buundada Heerka 4aad Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee Washington (WELPA). Inta badan ardayda waxay ku guuleystaan ka-bixidda barnaamijka muddo *INSERT NUMBER* sanno. Kaddib marka uu ka baxo barnaamijka, waa lala socon doonaa shaqada uu qabto cunugaada si loo ogaado haddii loo baahan yahay kaalmo dheeraad ah xagga aqoonta. *INSERT SCHOOL YEAR*, *INSERT ADJUSTED 5-YEAR GRADUATION RATE*% ardayda ka qalin jebisa darajada toban iyo labaad ee weli xaqa yeesha barnaamijka horumarinta luqadda Ingiriisiga ayaa ka qalin jebiyay waqtigii loo qabtay ama muddo hal sanno dheeraad ah gudaheeda.

Haddii u ilmahaagu leeyahay naafonimo, barnaamijka horumarka luqadda Ingiriisga iskula dubbaridi doonta shaqaalaha ku habboon in lala kulmo ujeeddooyinka Waxbarashada Loo-Shaqsiyeeyay Ilmahaaga ama Qorshaha 504.

Anigu si adag ayaan kuugu dhiirri-galinayaa inuu ilmahaagu ka qayb qaato barnaamijka horumarka luqadda Ingiriisga oo aan adiga kugu marti-qaadayaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato arrimaha ku saabsan faa'iidooyinka barnaamijka. Hase yeeshe, waxaad xaq u leedahay inaad ka bixiso ilmahaaga barnaamijka luqad baritaanka waqti kasta.

Fadlan soo booqo dugsiyaga si looga wada hadalo horumarka ilmahaaga horumarka luqadda Ingiriisga iyo ku guuleysifa tacliimeed. Kala xiriir *INSERT NAME* taleefanka *INSERT PHONE NUMBER* haddii aad rabto inaad qabsato ballan.

Somali
(Af-Soomaali)

**Ilmahaaga ayaa ka qoran barnaamijka(yada) horumarka luqadda Ingiriisiga ee soo socda:**

____ Barnaamij laba-luqadood ah
____ Waxbarashada Horumarka Laba Luqoodka ah (Ka bixitaan dambe)
____ Waxbarashada Laba Luqoodka Ku-Meel-gaarka ah (Ka bixitaan hore)
____ Waxbaritaan Gabaadsan
____ Barnaamijka Yimaddaha-Cusub

**Dugsiga degmo ayaa leh barnaamijka(yada) horumarka luqadda Ingiriisiga ee soo socda:**

____ **Barnaamij Labada-Luqadood**: Barnaamijyada labada luqadood waxay bixiyaan tababarka luqadda midaysan iyo aqoonta xagga kuwa ku dhashay ee ku hadla Ingiriisiga iyo kuwa ku dhashay ee ku hadla luqad kale, ujeedadana waxay tahay in marka kowaad heer sare la gaarsiiyo aqoonta, iyo marka labaadna aqoonta luqadda, iyo isfahamka ka dhexeeyo hiddaha (Christian, 1994).

____**Waxbarashada Horumarka Labada Luqadood (Ka bixidda raagta):** Waxbarashada Koriimada Labada Luqadood (Developmental Bilingual Education) (DBE), loona yaqaan Ka-Bixidda-Raagta ee Labada Luqadood (Ramirez, 1992), waxay ardayda barata luqadda Ingiriisiga wax ku bartaa Ingiriisi iyo luadooda kowaad labadaba ~~xagga waxbarashada~~. Barnaamijyada DBE ayay ujeeddadoodu tahay sidii loo horumarin lahaa ku guuleysiga tacliimeed ee heerarka sare ah dhammaan qaybaha manaahijta iyo xirfad buuxda oo luqadda tacliinta ee luqadaha koowaad iyo labaad ee ardayga.

____ **Waxbarashada Laba Luqoodka Ku-Meel-gaarka ah (Horay-uga bixidda):** Waxbarashada Labada Luqad ee Ku Meel Gaarka ah (Transitional Bilingual Education) (TBE) - loona yaqaan Horay-uga bixidda waxbarasada labada luqadood (Ramirez, 1992) waxay ardayda wax ku bartaa luqadda luqadda aasaasiga ah ee ardayga inta uu ka barnaayo Ingiriisiga.

____ **Hooyga Tababarka ama Tababarka ku Saleysan Maadada (Sheltered Instruction or Content-Based Instruction):** Hooyga Tababarka iyo Tababarka ku Saleysan Maadada waa habab wax lagu baro ardayda barata luqadda Ingiriisiga (ELL) iyadoo la isticmaalaayo xiilado gaar ah si maadooyinka looga dhigo kuwo la fahmi karo lana gaari karo inta la horumarinaayo koriimada luqadda Ingiriisiga ardayga. Gobolka Washington, ardayda koox ahaan looga sooco fasalka ama kuwo koox ahaan la geliyo fasalka ESL waxay ka tirsan yahiin kooxdaan.

____**Barnaamijka Yimaddaha-Cusub:** Barnaamijyada yimaddaha-cusub ayaa ka caawiya ardayda inay yeeshaan xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee bilowga ah iyada oo ay weheliyaan xirfadaha iyo aqoonta waxbarashada muhiimka ah, iyo inay la qabsadaan nidaamka dugsiya Mareykanka.

Daacadnimo,

*INSERT NAME*